

Haa Mahadsanid!

Kuwani waxaa lagu ridi karaa galka bunniga ah:

- Qolofa khudrada, khudaarta cagaaran, ukunta iyo xayawaanka badda ee qolofa leh sida carsaanyada
- Lafaha yar-yar iyo haraaga hilibka, kaluunka iyo digaaga
- Baasto, bariis iyo baradho
- Boorash iyo daqiiq
- Roodhi, buskud, keega iyo nac-naca
- Haraaga qaxwaha la kariyay, shaandhada kafeega iyo shaaha
- Burcadka iyo waxyaabaha roodhida is-mariska la saarto




Liistada hubinta

- Haraaga raashinka ee qoyan u daa in qoyaanku ka dareero ka hor intaan lagu tuurin
- Qallaylkaku fiiq diirka khudrada iyo khudradaha cagaaran adigaa la kor taagan galkan.
- U daa galkan inuu yaalo meesha qabata
- Galkan ha buuxsamo ugu badnaan halka ah calaamada xariijinta ah.
- Haraaga raashinka ha ku cadaadin galkan
- Galka si joogto ah u baddel

Maya, laakiin mahadsanid!

Kuwani ma la oggola in lagu rido galka bunniga ah:

- Tobaakada, haashka sigaarka, tubaakada debinta iyo xanjada
- Xafaayadaha, warqadaha wax lagu tir-tiro iyo alaabooyinka kale ee nadaafada sida waxyaabaha hoosta la geliyo
- Ubaxyada, dhirta iyo qashinka beerta jardiinada
- Galalka makiinada guriga lagu xaaro
- Ciida bisada iyo waxa ka daata xayawaanka guriga lagu rabaysto
- Quraarad iyo bir
- Caagadaha jilicsan iyo kuwa adag



Baakadaha ah caag, warqad, quraarad iyo bir waxaa la dhigayaa xarunta dib u cusboonaysiinta qashinka ee kuugu dhow. Qashinka waaweyn waxaa la gaynayaa xarunta dib u cusboonaysiinta qashinka ee shaqaale joogo.

Dheeraad ka akhriso www.vivab.info/sorteringsguide



Jeex oo ku dhaji qaboojiyaha!

Alaab dhashaad oo ku calaamadan degaanka 311 834
Sawir: Christel Lind, Dabbaadi, Itorpid Media AB, Göteborg 2014



Tilmaamida
kala soocida
ee qashinka
raashinka



Waa maxay sababta aanan anigu baeda ugu isticmaali karin haraaga raashinka?

Marnaba bac ha u isticmaalin in lagu sii rido galka ay VIVAB bixiso. Haddii balastiig galo nidaamka gaasta bayoolajiga ah waxaa khasab noqonaysa in tiro badan oo haraaga raashinka ah la daadiyo. Foostoyinka bunniga ah ee ay ku jirto balaastig ma la faaruqinayo oo waxaa dhacaya khalad.

Galka warqada ah si fiican ayuu ugu shaqeeyaa nidaamka gaasta bayoolajiga ah. In la isticmaalo tani waxay suurtagalinaysaa in dhamaan qashinka raashinka loo isticmaalo gaasta bayoolajiga ah iyo nafaqada beeraha ee dabiiciga ah.

Miyaa haraaga qaxwaha la kariyay iyo kiishashka shaaha lagu ridi karaa qashinka raashinka?


Haa, tani waa la oggolyahay. Qiimayn la sameeyay waxay muujinaysaa in gaasta bayoolajiga ah ee laga soo saari karo haraaga qaxwaha la kariyay ay marka dambe ka hortagto duugoobida makiinadaha gaasta bayoolajiga ah. Haraaga qaxwaha ee ku jira shaandhada ee hore loogu soocay inuu yahay qashinka guryaha ee la gubi karo waxaa iminka lagu ridi karaa galka bunniga ah. Xitaa shaaha caleenta ah iyo kiishka shaaha ee warqada waxaa lagu ridi karaa galkan, laakiin birta iyo balastiiga kiishka shaaha waa in gaar looga saaraa.

Sidee ayaan u heli karaa galkan oo badan?

Miyaad degantahay guri ah fiilo? Waxaad adigu galkan oo badan ka dalban kartaa www.vivab.info/minasidor.

Adigu waxaad u baahanaysaa inaad haysato lambarkaaga macmiilka iyo tobankaaga lambar oo aad diyaar la tahay. Waxaa xitaa suurtagal ah in inaad hal gal ah ku xirto daboolka foostadaada bunniga ah ka hor intaan la faaruqin oo markaasi waxaad heli doontaa galyo badan xilliga wakhtiga faaruqinta ku xigta.

Miyaad degantahay guri ku yaala dhismo fooq ah? La xiriir ururka iskaashatada gurigaaga ama mulkiilaha guriga ee bixiya galalkan.



Sidan ayaad u isticmaalaysaa galkan.

- ☑ Kala bixi galkan warqada ah oo dhig meesha qabanaysa. Waa muhiim in la isticmaalo meesha qabata ama haysa maadaama ay keento in hawadu ku dhex wareegto galkan si uu u ahaado qalayl.
- ☑ Hoos u laab hareerayaasha galkan warqada ah, tani waxay fududaynaysaa in hadhow dib loo xiro galkan.
- ☑ Fadlan khudrada iyo khudrada cagaarka ah toos ugu fiiq galkan si aanu u qoyin.
- ☑ U daa in haraaga raashinka ee qoyan uu qoyaanku kaga dareero meesha wheelka. Waxaa faa'iido leh in la isticmaalo caaga sida shaandhada ah ee la dul saaro godka meesha maacuunta lagu dhaqo!
- ☑ Haddii qashinka raashinkaagu aad u qoyanyahay waxaad hoosta dhigi kartaa wax yar oo ah warqada lagu tirtiro guriga.
- ☑ Galkan ha buuxsamo ugu badnaan halka ah calaamada xariijinta ah.
- ☑ Iska ilaali inaad isku cadaadis qashinka raashinka.
- ☑ Dib isugu xir galkan si fiican iyadoo aad isku soo ururinayso dactalada.
- ☑ Galkan badanaaba baddel, waxaa fiican maalin dhaaf ama saddexdi maalmoodba mar.
- ☑ Galkan ku rid foostada bunniga ah ee loogu talagalay qashinka raashinka.

**Ku mahad
sanid
inaad kala soocdid
qashinkaaga
raashinka!**

Iyadoo gaasta bayoolajiga ah laga sameeyo qashinka raashinka waxaynu wax u taraynaa in raad ku yeelashada deegaanku yaraado oo sidaasi loo helo deegaan fiican. Gaasta bayoolajiga ah waxay baddashaa shidaalka oo waxaa loo isticmaalaa inay ku shaqeeyaan baabuurta qashinka qaada, basaska iyo gaadiid kale.

Qashinka raashinka waxaa kale oo laga soo saaraa nafaqada bayoolajiga ah ee beeraha taas oo sidii nafaqo dabiici ah Qaabkaas ayaad wax ugu taraysaa wareega deegaanka dabiiciga ah.

